

# Ahaanshaha Baraha Daryeelka Maalintii ee Qoyska: Waxyaabaha aad u baahantahay in aad oggaatid



**SOMALI**

Nofeembar 2018



Australian Government  
Department of Education and Training



NSW FAMILY DAY CARE  
ASSOCIATION INC.

# QALABKA MACALINKA DARYEELKA MAALINTA QOYSKA: **Ahaanshaha Baraha Daryeelka Maalintii ee Qoyska: Waxyaabaha aad u baahantahay in aad oggaatid**

Haddii aad ka fakereysid inaad noqotid, ama lagu soo jeediyay inaad noqotid, macalinka Family Day Care waxaa jiro waxyaabo dhoor oo aad muhiim u ah ee ah inaad ka oggaatid si aad u hubisid inaad si guul leh ugu bixisid guul tahay oo aad siisid waxbarashada carruurnimada hore iyo daryeelka carruurta yar ee loogu ansixiyay gurigaaga.

Marka aad iska diiwaangelisid adeega Family Day Care waa in ay ku siiyaan tababarka nidaamka dhameystiran ee daboolaa aagaga sida daryeelida carruurta, dajinta waaya aragnimada waxbarashada ee carruurta, caafimaadka iyo badbaadada (ee adiga iyo carruurtaada) iyo illaalada carruurta.

Adeegaaga waa in uu kugu caawiyo in aad fahantid oo aadna raacdid Sharciga Caawinta Qoyska ee khuseeya caawimaada lacagta daryeelka carruurta ee ay maamulaan iyaga oo ka wakiil ah qoysaska u qalma.

Buugyarahaan wuxuu daboolaa waxyaabaha ugu muhiimsan ee aad u baahantahay inaad ka oggaatid aagaga kale ka hor inta aadan u bilaabin sida macalin sida – maamulka, qidmooyinka iyo kaalmooyinka dowlada. Waxay kugu caawineysaa inaad u shaqeysid si sharci ah sida macalinka. Waxay kugu caawineysaa fahamka sharuudaha maamulka ee kaalmooyinka daryeelka carruurta kala duwan ee u qalma qoysaska waxay heli karaan in ay ku caawisaa qarashka qidmooyinka. Waxay sidoo kale ka hadashaa waxa aad awoodid oo aad ka filaneysid adeega Family Day Care ee aad iska diiwaangelisay.

## **Qiyaanada iyo Family Day Care**

In ka badan dhoorkii sanno ee la soo dhaafay waxaa jiray lambar kordhaya ee Family Day Care ee la xiriiro dhacdooyinka halka macalimiinta iyo adeegyada ay masuul ka ahaayeen qiyaanada looga helayo lacagta Dowlada Austareeliya iyada oo la gaarsiinayo ama la iska dhigayo in ay gaarsiiso adeegyada Family Day Care. Buug yarahaan waxaa loogu tallo galay inuu hubiyo inaad ka fogaan kartid si qalad ah inaad uga qeybgashid qiyaanada ama dabecada u hogaansan-la'aanta.

## **Qidmooyinka Family Day Care**

Adeegyada Family Day Care wuxuu ku dalacaa qidmooyinka qoysaska daboolayo qarashaadka daryeelka carruurta. Sidee ayay midaan ugu dhacdaa adeeg walba ee ka duwanaa karto – qoysaska waxay si toos ah lacag u siin karaa macalimiinta ama waxay bixin karaan adeega, oo ay la jiraan kadib gelinta lacagta akoonka bangiga macalinka.

## **Kaalmooyinka daryeelka carruurta**

Dowlada Oostareeliya waxay siisaa Kaalmada Daryeelka Ilmaha qoysaska u qalma si ay gacan uga geysato yareynta qiimaha lacagaha. Adeegyada Daryeelka Maalintii ee Qoyska waxay ku qaataan Kaalmada Daryeelka Ilmaha iyaga oo ka wakiil ah qoysaska waxayna u gudbiyaan qoysaska iyaga oo u marsiinaya ujuurooyinka la yareeyay.

## **Kaalmada Daryeelka Carruurta ee Dheeraadka ah**

Kaalmada Daryeelka Carruurta ee Dheeraadka ah waxaa la siiyaa qoysas ay haysato duruufo kala duwan (tusaale ahaan, dhibaato dhaqaale kumeel gaar ah, u gudbid shaqo, caafimaadka ilmaha, iyo awoowayaasha ama ayeeyayaasha ee ah daryeelayaasha aasaasiga ah). Midaan darteeda waa muhiim in aad bixisid macluumaad sax ah oo ku saabsan daryeelka ilmaha aad siisid qoysaska ku jira adeega Daryeelkaaga Maalintii ee Qoyska sababtoo ah adeega wuxuu u isticmaali doonaa macluumaadkan in loogu soo sheego Dowlada daryeelka carruurta ee lagu bixiyay ujeedooyinka Kaalmada Daryeelka Carruurta iyo Kaalmada Daryeelka Carruurta ee Dheeraadka ah.

## **Sharciyada ugu muhiimsan**

Lacagta caawimaada daryeelka carruurta waxaa lagu bixiyaa adeegyada Daryeelka Maalintii ee Qoyska kuwaas oo lagu siiyo qoysaska u qalma hoosta Sharciga Caawimaada Qoyska. Sharcigan wuxuu uga baahan yahay adeegyada Daryeelka Maalintii ee Qoyska iyo macalimiintooda in ay raacaan xeerarka si loo habsado in lacagta caawimaada daryeelka ilmaha loo bixiyay si sax ah.

Tusaallooyinka sharciyada waa:

- ▶ Dhammaan carruurta waa in ay sixiixaan imaatinkooda iyo bixitaankooda ee daryeelka maalin walba. Macalimiinta Family Day Care waa in ay joogteeyaan diiwaanada ka qeybqaadashada oo isbuucla ah si ay u muujiyaan waxa carruurta laga daryeelay, maalmaha iyo inta ay socotay. Diiwaanadaan waxaa looga baahanyahay in lagu xaqiijiyo in canuga gaarka ah ee kaalmada la siiyay, xaqiiqdii ka qeybgalay daryeelka waqtiyada la sheegay, ama u maqnaa sabab la ogolaan karo.
- ▶ Diiwaanada ka qeybgalka waxaa looga baahanyahay in loogu diro Dowlada gudaha jadwalka .
- ▶ Dhammaan qidmooyinka la siiyay qoysaska waxay u baahanyihiin in si sax ah loo helay. Qoysaska u baahan in ay ogaadaan imisa kaalmadooda ay aheyd iyo waxa ay u bixiyeen sida booska u dhaxeeyo kaalmada iyo qidmada buuxdo ee lagu dalacay.

## **TALLADA QADKA DANSAN**

Haddii aad ka walaacsantahay qiyaanada dhaceyso, waxaad la xiriiro kartaa Waaxda Waxbarashada iyo Tababarka Dowlada Austareeliya tallada qadka dansan ee Waaxda Waxbarashada iyo Tababarka tallada qadka dansan ay la jiraan sharaxaado gaar ah ee 1800 664 231 ama i-meelka [tipoffline@education.gov.au](mailto:tipoffline@education.gov.au). Waxaad ahaan kartaa qarsoodi haddii aad rabtid.



## HADDII WAX AY U MUUQDAAN IN AY QALDANYIHIIN, HA SAMEYNIN!

Miyuu kuula yimid qof inaad sameysid wax u muuqdo sida ka hor imaan karto sharciga, ama u muuqata qalad? Laga yaabo macalin kale ama qof kale oo ku jiro adeega Family Day Care? Haddii aad ka shakisantahay, hubi haddii waxa lagu weyddiyay inaad sameysid ay sharci tahay. I-meelka [info@fdcsupport.org.au](mailto:info@fdcsupport.org.au) Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa maamulka sharciga gobolka (haddii ay ku saabsantahay badbaadada canuga ama waxbarashada) ee [www.acecqa.gov.au/help/contact-your-regulatory-authority](http://www.acecqa.gov.au/help/contact-your-regulatory-authority) ama Waaxda Waxbarashada iyo Tababarka, haddii ay tahay in lala siiyo dhaqamada ku dalacida qidmada ee **1800 664 231**.

### Qodobada muhiimka ah

- ▶ Family Day Care wuxuu ku daboollanyahay dhoor sharciyo iyo qaanuunada. Waxay u jiraan in ay:
  - hubiyaan in carruurta ay badbaado yihiin oo ay wax bartaan iyaga oo uu daryeelayo macalin iyo
  - hubso in ujuurrada caawimaada daryeelka carruurta loo bixiyay sida dhimis lacag ahaan oo la siiyo qoysaska u qalma.
- ▶ Macalimiinta Family Day Care waxay midkood shaqaaleysiiyaan adeega Daryeelka Maalinta Qoyska ee ay iska diiwaangeliyeen ama ay hoos kala heshiyeen iyaga.
- ▶ Sharciyada iyo qawaaniinta sidoo kale sida xeerarka adeega Family Day Care iyo nidaamyada lagu go'aansanayo sida aad u maamushid ganacsigaaga.
- ▶ Sharciyadaan/qaanuunada iyo xeerarkan ayaa go'aansado:
  - Sida adeegaaga u dajiyo qidmooyinka
  - Sida qoysaska loogu dalaco adeegaada iyo rasiidyada ay helayaan
  - Warbixintee ayaa u baahan in lagu aruuriyo diiwaangelinta
  - Warbixintee ayaa ah inaad ku soo wargelisiid adeegaaga Family Day Care ee ku saabsan ka qeybgalka carruurta iyo inta jeer ee aad u baahantahay inaad midaan soo wargelisiid
  - Caymiskee ayaa ah inaad qabatid
  - Nidaamkeed ayaa ah inuu u diyaarsanaado qoysaska si ay u keenaan ama uga wadaan carruurta daryeelkaaga.

- ▶ Dowlada ayaa bixiso kaalmooyinka qoysaska lagu caawinayo yareynta qarashka qidmooyinka. Macalimiinta Family Day Care waxay muhiim ka yihiin caawinta lagu hubinayo in lacagta si sax ah ay u sheegteen:
  - ka saxiixida waaladiinta diiwaanka ka qeybgalka waqti walboo ay dajiyaan oo ay soo qaadaan canugooda
  - saxiixida ka maqnaashaha daryeelka markii canuga ay daryeelaan uu maqanyahay
  - raacida sharuudahooda adeega ee gudbinta diiwaanada ka qeybqaadashada.
- ▶ Diiwaanadaada waxay u baahanyihiin in ay sax ahaadaan si loo hubiyo in aad raaceysid sharciga.
- ▶ Adeegyada Family Day Care waa in ay siiyaan taageero kala duwan macalimiinta ka diiwaangashan iyaga si loo hubiyo in maamulka si sax ah loo sameeyo oo sharci ah. Kuwaan waxaa ku jiro nidaamka tababarka, hormarinta xirfada socota iyo taageerada joogtada ah.
- ▶ Ha iska diiwaangelin adeega Family Day Care ee aad ka shakisyay in ay jabineyso sharciga. Tani waxay ku gelin kartaa halista jabinta sharciga sidoo kale.
- ▶ Ha:
  - saxiixin kulamada waxbarashada iyo daryeelka aadan bixin
  - saxiixin wax walba oo dhahayo inaad ku daryeeshay carruurta qaar maalaha qaar ama waqtiyada qaar illaa aad daryeel siisay
  - weydiinin qoysaska in ay saxiixaan wax walba oo dhahayo inaad ku daryeeshay carruurtooda waqtiyada qaar illaa si dhab ah aad u daryeeshay carruurtooda
- ▶ Haddii aad saxiixdid foomamka ama waraaqaha kale ee aan sax aheyn, waxaad jabineysaa sharciga.

### Sidee ayay u shaqaynaysaa lacagta caawimaada daryeelka carruurta?

Lacagta caawimaada daryeelka carruurta waa mid ku salaysan in qoyska uu ka soo baxo dhammaan shuruudaha u qalmi taanka oo ay ka mid tahay qiimeynta dakhliga qoyska la isku daray ee sannadlaha ah iyo baaritaanka hawsha. Lacagta caawimaada daryeelka carruurta waxaa si guud ahaan loogu bixiyaa tooska adeega daryeelka carruurta si loogu siiyo qoysaska u qalma sida dhimis lacageed.

Qoysaska waxay bixiyaan adeegooda inta u dhaxaysa tirada lacagta Kaalmada Daryeelka Carruurtooda iyo lacagaha lagu soo dalacay. Si aad ugu qalantid Kaalmada Daryeelka Carruurta, qoysaska waxaa khasab ku ah in ay mas'uul ka noqdaan bixinta lacagaha daryeelka carruurta ee hoos imaanaysa U-hoggaansamidda Qaban qaabada Qoran ee lala sameeyo bixiyaha daryeelka ilmaha.



# QALABKA MACALINKA DARYEELKA MAALINTA QOYSKA SU'AALAHAA INTA BADAN LA IS WEYDIIYO

This brochure has been produced in 11 languages: Amharic, Arabic, Assyrian, Dari, Dinka, French, Hazaragi, Nuer, Somali, Sudanese, and Swahili. To find the brochure in your language please go to [www.fdcsupport.org.au](http://www.fdcsupport.org.au)

## Maxaan u dhahaa waaladiinta in ay carruurtooda saxiixaan imaanshaha iyo bxixitaanka maalin walba?

Diiwaanada ka qeybqaadashada waa waraako sharci ee loo hayo in lagu hubiyo in qoysaska sheeganayo kaalmooyinka Dowlada ay dhabtii la siiyay daryeelka carruurta.

## Muxuu sameeyaa adeegeyga si uu ii taageero aniga?

Adeegaa waa inuu:

- ▶ Ku siiyaa nidaamka tababarka ka hor inta aadan u bilaabin sida macalin
- ▶ Cadeeyo qidmooyinka ama canshuuraha ay ku dalacaan
- ▶ Bixiyo hormarinta xirfada iyo tababarka socdo
- ▶ Ku soo booqdo si joogto ah
- ▶ Kugu caawiyo fahamka oo raac Sharciga Qaranka iyo Qaanuunka oo u hogaansanaato Sharciga Caawinta Qoyska ee la xiriiro kaalmooyinka qoysaska ay ku maamulaan matalaada Dowlada.

## Adeega aan iska diiwaangeliyay ayaa iweydiya marwalba inaan saxiixo waxyaabaha aan fahmin. Miyaan saxiixaa?

Maya. Hubi inaad fahamsantahay wax walba oo aad saxiixdo haddii kale waxaad si qalad u jabineysaa sharciga.

## Waa maxay sharciyada iyo qaanuunada daboolo Family Day Care ?

Waxaa jira tiro sharciyada maamulo sida adeegyada Family Day Care iyo macalimiinta u shaqeeyaan. Sharciyada ugu muhiimsan waa:

- ▶ **Adeegyada Waxbarashada iyo Daryeelka Sharciga Qaranka**  
[www.acecqa.gov.au/national-law](http://www.acecqa.gov.au/national-law)
- ▶ **Adeegyada Waxbarashada iyo Daryeelka Qaanuunada Qaranka**  
[www.acecqa.gov.au/national-regulations](http://www.acecqa.gov.au/national-regulations)
- ▶ **Sharciga Caawinta Qoyska**  
[www.education.gov.au/child-care-legislation](http://www.education.gov.au/child-care-legislation)

## Maxay u jiraan sharciyo iyo qaanuunada badan?

In la daryeelo carruurta waa shaqo aad muhiim u ah. Sharciga Waddanka iyo Xeerarka waxay u dejiyaan heer qaran oo loogu talagalay waxbarashada xiliga hore iyo daryeelka ilmaha si looga dhigo carruurta kuwo ammaan ah. Dowlada Oostareeliya waxay lacag badan ku bixisaa caawimaada daryeelka carruurta. Sharciga Caawinta Qoyska waa mid kusalaysan Kaalmada Daryeelka Carruuta iyo Kaalmada Daryeelka Carruurta ee Dheeraadka ah si lo yareeyo lacagta daryeelka carruurta ee qoysaska.

<b>Amharic</b>	በራብዎ ቋንቋ በራራ ወረቀት ከሚገኙት <a href="http://www.fdcsupport.org.au">www.fdcsupport.org.au</a> ድረ ገጽጎ ይጎኙ
<b>Arabic</b>	لإيجاد الكتيب بلغتك، يُرجى تصفح موقع الويب <a href="http://www.fdcsupport.org.au">www.fdcsupport.org.au</a>
<b>Assyrian</b>	لەپێنجەسەفە ئێمە موڤەئە ئێخەنەجە، ئێخەنە جەهە، ئێسەفە، ئێخەنە <a href="http://www.fdcsupport.org.au">www.fdcsupport.org.au</a>
<b>Dari</b>	برای دریافت جزوه به زبان خودتان، لطفاً به <a href="http://www.fdcsupport.org.au">www.fdcsupport.org.au</a> وبسایت مراجعه کنید.
<b>Dinka</b>	Tè koor yin kitap nē thondu kitam tō wēlthin ke yin lo nē <a href="http://www.fdcsupport.org.au">www.fdcsupport.org.au</a> .
<b>French</b>	Pour trouver la brochure dans votre langue, veuillez visiter le site <a href="http://www.fdcsupport.org.au">www.fdcsupport.org.au</a> .
<b>Nuer</b>	Ke yöö bi njac jiek rey waregakä/ kie majale ke thuok du, göa en yöö bi wä kä <a href="http://www.fdcsupport.org.au">www.fdcsupport.org.au</a> .
<b>Hazaragi</b>	برای دریافت این بروشور به زبان خودتان، لطفاً به <a href="http://www.fdcsupport.org.au">www.fdcsupport.org.au</a> وب سایت مراجعه کنید.
<b>Somali</b>	Si aad ugu heshid buugyaraha luuqadaada fadlan booqo <a href="http://www.fdcsupport.org.au">www.fdcsupport.org.au</a> .
<b>Sudanese</b>	لإيجاد الكتيب بلغتك، الرجاء تصفح موقع <a href="http://www.fdcsupport.org.au">www.fdcsupport.org.au</a>
<b>Swahili</b>	Ili kupata brosha hiyo kwa lugha yako tafadhali tembelea tovuti <a href="http://www.fdcsupport.org.au">www.fdcsupport.org.au</a> .

## KA OGOOW WAX BADAN

Buug-yaraha Bixiyaha Daryeelka Carruurta waa xog aasaasi ah oo loogu talagalay bixiyayaasha waxbarashada carruurta yaryar iyo daryeelka carruurta waxaana laga heli karaa boggan internetka ah:

[www.education.gov.au/child-care-provider-handbook-0](http://www.education.gov.au/child-care-provider-handbook-0)

Wax badan ka ogow adiga oo booqanayo websaydyadaan:

- ▶ [www.education.gov.au/compliance](http://www.education.gov.au/compliance)
- ▶ [www.fdcsupport.org.au](http://www.fdcsupport.org.au)
- ▶ [www.education.gov.au/child-care-providers](http://www.education.gov.au/child-care-providers)
- ▶ [www.fdca.com.au](http://www.fdca.com.au)
- ▶ [www.acecqa.gov.au](http://www.acecqa.gov.au)

Ama adiga oo booqanayo adeega Family Day Care ee adiga kuu dhow. (Si aad u heshid adeegaaga kugu dhow, booqo [www.fdca.com.au](http://www.fdca.com.au) oo riix badhanka 'findchildcare'.)



Australian Government  
Department of Education and Training



NSW FAMILY DAY CARE  
ASSOCIATION INC.